Ref: KTS/XG/01-09/20 **Date: 11/11/2020**

Ku: Dhamaan Shirkadaha Korontada
Og: Agaasimaha Guud ee Komishanka
Og: Xubnaha Komishanka
Og: Wasiirka Macdanta iyo Tamarta JSL
Og: Wasiirka Arimaha Gudaha JSL
Og: Madaxweynaha JSL

WAREEGTO KOMISHAN

Komishanka Tamarta Korontada Qaranku isagoo tixraacaya: Xeerka Tamarta Korantada Somaliland (XEER Lr. 81/2018) iyo Digreetada Madaxweynaha JSL ku asaasay Komishanka kuna faray in la helo :- Koronto la-awoodi karo , dalka wada gaadha, , nidaamsan, bedqabta layskuna halayn karo, lagana dhalin karo tamarta la cusboonaysiin karo(Renewable Energy) iyadoo la dhiirigalinayo maalgashiga gudaha iyo dibeda.

Komishanku markuu arkay: Qiimaha Korontada ee kala duwan ee dalka ka jira waxa uu xaqiiqsaday in qiimo dhimis macquul ah la samayn karo xaalada hadda jirta.

Komishanku markuu arkay: Xeerka Tamarta Qodobkiisa 10aad farqadiisa 8aad, waxa uu dhiirrigeliyaa ka ganacsiga tamarta ee **tartanka xorta ah** oo caddaalad ku dhisan kuna salaysan qaabdhismeedka suuqa korantada.

Komishanku markuu arkay: Sababaha keena khilaafaadka Shirkadaha iyo is qabsiga xad dhaafka ah ee ka dhashay qodobadda hoos ku xusan:

1. Biraha iyo Xadhkaha aan la waafajinin buuga hagaha nidaaminta
2. Fidin , xoojin iyo qaybin koronto oo aan ogolaansho loo haysan
3. Macmiil (customer) shirkad labaad soo gashanaya
4. Kala sheegasho Aag (zone) aan xuduud iyo xeer toona jidayn

Komishanku markii uu kulamo la yeeshay shirkadaha korontada: waxa uu go'aamiyay in suuqa korontadu ku shaqeeyo sidda Xeerka Tamartu dhigayo. Komishanku waxa kale oo u la wadaagnay Shirkadaha Korontada in uu jiro qorshe qaran oo ku wajahan in la dhiso "City Grid" ah caasimada Hargaysa, Sidaa awgeed, waa in shirkaduhu aanay ku degdegin fidinta Korontada qorshe la'aanta ah ee imika jirta , si loola jaan qaadi karo qorshaha cusub (Master Plan) .

Komishanka Tamarta Korontada Qaranku: isagoo tixgelinayna muhiimada ay dalkeena u leedahay Nidaaminta iyo Horumarinta Tamarta Korantadu iyo Xal u helidda khilaafadka lagu yarayn karo , waxa uu shirar la yeeshay Shirkadaha Korontada si ay u suurto gasho in horumarka iyo nidaaminta Korontada Qaranku higsanayo la gaadhi karo iyadoo la raacaayo qodobadan hoos ku qoran:-

1. Qiimo koronto oo dabacsan ayaa ah furaha hormarka bulshada, kor u kaca nolosha iyo koboca dhaqaalaha sidaa daraadeed waxa waajib ah in aad hoos u dhigtaan qiimaha korantada lagana dhigo mid la awoodi karo oo xaqiiqada u dhaw.
2. Bulshada danyarta ah ee aan awoodi Karin qiimaha korontada waxay mudan yahiin in il gaar ah lagu eego.
3. Ku dhaqanka habraaca uu farayo Buuga Hagaha Nidaaminta Tamarta korontadu, ka dib marka ogolaasho laga helo Komishanka Tamarta Qaranka
4. Xadhkaha Dabkoodu sareeyo (**High voltage lines)** ee magaalada dhex mara waxaa loo asteeyay oo keliya in ay maraan dhulka hoostiisa, iyada oo la raacayo buuga Hagaha.
5. Shaqooyinka ay soo dalbadaan shirkaduhu, marka uu Komishanku hubiyo in ay u dhamaystiran yihiin shuruudihii looga baahnaa, Komishanku waxa uu samaynayaa qorshe iyo wakhti fulineed.
6. Shirkadina ma fara gelin karto shaqo aanay lahayn oo cid kale loo fasaxay.
7. Shirkada
8. ay ku cadaato in ay shirkad kale oo ogolaansho ka haysata komishanka ku xad gudubta, waxay la kulmi doontaa ganaax lacageed iyo digniin, haddii ay intaasi deeqi weydo waxaa laga qaadi doonaa talaabo adag oo sharciga waafaqsan.
9. Shirkadii ay shaqaalaheedu gaystaan dhib keenta khasaare waqti, naf iyo maalba leh, waxaa masuuliyadeeda laga la xisaabtamayaa mulkiilayaasha shirkada.
10. Si loo kala garto shirkadaha, shaqaalahooda, gaadiidkooda, birahooda, kaabadahooda laydhka, I.w.m Waa in ay midabka iyo Sumada **(Logo)** shirkadu gaarka u leedahay ka muuqataa.
11. Badbaadada goobta shaqada , farsamo-yaqaanada iyo Engineerada, waxaa lagama maarmaan ah in agabkii badbaada **(PPE)** sida: koofiyada, Gacmo gashi, Kabaha , Muraayada indhaha , Labiska dharka shirkada, iyo qalabkii farsamo (Tools) ay u dhanyihiin **I.W.M.**
12. Si aynu caalamka ula jaan qaadno ruqsadaha Korontada waxaa loo qaybinayaa saddex qaybood si waafaqsan xeerka tamarta Korontada :

    a. Dhalin (Generation) b. Gudbin (Transmission) c. Qaybin (Distribution)
13. Komishanku waxa uu soo saaray sida xeerka korantada tamartu uu jidaynaayo ganaaxyo ka dhalanaya talaabooyinka sharci daro ee shirkadahu ku kacaan.

Gabogabadii, komishanku waxa uu soo dhawaynayaa wada shaqaynta Shirkadaha Korontada iyo daneeyayaasha si loo gaadho horumarka iyo hiigsiga ku wajahan qorshaha qaranka ee hormarinta tamarta korantada.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Faarax Cadare
Gudoomiyaha Komishanka Tamarta Korontada

SOMALILAND ENERGY COMMISSION
KOMISHANKA TAMARTA QARANKA